

Poems

Amina Said Ali

Duco

Allow baan iriye ergadeeyda iga ajiib,
Allaow arxan baan ku weeydiistey aad u weeyn,
Allow Soomaali eber weeye ehel ka yeel,
Allow ardaageena nabadii aloosisaa.

Quruxda dalka

Dhulyahow bilicdaada baan buug ku qorahayaa,
Beenta kuu faaftey xaal baan ka bixin hayaa,
Baadinimadeeyda taariikhda barahayaa,
Baddaas Hindiyiyo waxaa bowdka kuugu yaal,
Webi ballaarkooda dunidoo dhaan biili kara,
Dhul aan baraf iyo lahayn buuro lagu qar-qaro,
Berriga xooluhu ku beermaan biciid harsado,
Anna miyaan kugu bakhtiyey taan Ilaah i badin.

Calaacal

Cirku haduu kula dagaaloo dhulkuna ku duro,
Hawadu ku damqeeyso neeftiina kaa dageeyn,
Dooni aad haysan badahiina kula dagaan,
Dugaag weeynaha badaha daaqa daris tiiin,
Dareen jira weey xaal aan caqliga ka dagin,
Dar xumo iyo dibir ka daalnoo dadd noo ma harin,
Dugsi waxaan moodeeyna dufaanta iyo dabeeyl,
Durbaankii colaadu dami waayey daa'in abad.

Dagaal ooge

Afrika nimmankaas gubaayoo gaddoon ku ridey,
Gaajada iyo cudurka gaadiidka noogu raray,
Gurboodka u doortay gaashaandhig aan go'eeyn,
Qoriga u garwaaxshey asagoon sagaalkii gelin,
Garaadka ka lumiyey noormalaka garana heeyn,
Xabbadda gamisteeda moodaaya geesinimo,
Nafta la goynaayo ummaleeya iney gartahay,
Gibilku i xanuunye dunidooy garsoore noqo.

Kaalinta dumarka

Galool iyo mayrax kuu diiray gogol qorxoon,
Guri ducweeyn iyo makuu tagay gola dugsoon,
Gobanimada doonisteediina waan guntadey,
Gani waxaan heystey dahabkeygii waan u gaday,
Ama markii aan go'nayee dhiigu galalax yiri,
Qaxooti kuu galay gurboodkiina garab ku raray,
Tala midaad gooyso waataan gareeysan jirey,
Go'aan baan gaaray wiiloow gadii badalay,
Guuldaro iyo geeri waan diiday inaan go'naa,
Gorofta cayrtiyo waxaan diiday xero gumeed.

Waayeelka iyo Qurbaha

Qorbaan joogayoo qoraxdaan qareemiya,
Shimbirahaas qaylin Tuke waa i qaabilaa,
Goroyadeey soo qafaaleen qalbigu u qooq,
Qaxar intaan marayoo dunidoo dhan aan qax galaya,
Qaayr wuxuu yaalay buulkeeygii qada la'aan,
Mell aan qaran ahayoo magaceeygu qiima gala,
Qudho haday duusho qabriggeeygu saacad qodan,
Meel aan qaboojiyaba loo doonin meeyd qarxada.

Amaaan gabar

Fiyore curdan iyo Yar aad moodid mira castii,
Ama dhulkeeno cagaaro nirgilii curteen,
Shimbirtu cayn-cayn u qaadeysa heesa culus,
Ugaadu ciyeeyso casarkii ciyaarayaan,
Ciidku haaraha camirey oo mareer curdamay,
Caweeyska habeenkii mugdigeey cadceedisaa,
Caad masaarnee xidigahay la cayni tahay,
Cirkaas afrikeey cawareeysa iftiin ka culus,
Waxay cududeed saarta dhar wada carfoon,
Cumaamad la saaryo dumaroo dhan loo casuun,
Qurux cajab ah beey la ciirtaa cishaha habeen.

Dareen dumar

Sidii shimbra ciidayaan cadka lalahayaa,
Cirrkaa sare cedar qaboow baan cagaha dhigaa,
Dhulkaan cirifyada ka eega hadan cirr tagey,
Waxaa layrku caga-cageeya rugg aan cabiray,
Buug aan culuun badan ku qorey sheeko aan camiray,
Markaan cuntubyada akhriyey kooxa ii cuntama,
Maanku waa cirayaa wanaan camal kacaa,
Caado dumar weeye in ay reerka caymiyaan,
Caruurga iyo calalka mayraan cisho iyo leeyl,
Waxay ku cagaageen shaqo aan la caawineeyn
Oo aan citiraaf lahayn oo aan cidi ogeeyn,
Intaanan calafkeeygo go'en ciida leeygu rogin,
Codkeeygaan bixinayaa taarikh aan cayimay,
Mid aan caqlibadan lahayn yaanu iga carjabin.

Mogadisho

Malaha Muqdishobeey maankeeygaad ma-mushaa,
Malaha maskaxdiyo qallbiga moora kuugu taal,
Malaha marin dhiigu maaxaad marriimisaa,
Malaha mirahaagan miciyeeyaa malab ahaa,
Morcoodka iyo maango mooskagan mahadiyaa,
Malaha ciidadan marayaan maqsuud ahaa,
Malaha magaceeygan Soomaalaa midaba lahaa,
Malaha mowjadda badaadaa mulkiya ahayd,
Mahadho igu reebtey Muqdishobeey muran la aan,
Muriqii Soomaalay muqdishowey marin samaad,
Magalo madaxdiyiye taan midownoo aad muran baxdaa.